

# Kooxda taageerada dadka wax tarka kheryraadka kale

leh waxay kaa caawinayaan luqada- iyo  
fahanka dhaqanka



# Hordhac

Mararka qaar waxaa dhaci karta, in luqada iyo dhaqan kala duwanaanata, ay adkayso helitaanka adeegyadacaafimaad ee kamuunka uu bixiyo, iyo habka adeegyadan ay u shaqeeyaan. Kooxda taageerada dadka asalka kale leh, waxay kaa caawinayaan jidkii aad u mari lahayd.

- Ma la kulantaa dhibaatooyin, marka aad la xidhiidho kamuunka?
- Ma jiraan, waxyaboo aadan fahmin ama mugdi kaaga jiro, oo la xidhiidha adeegyadacaafimaad ee kamuunka uu bixiyo ama caawinaada aad ka hesho kamuunka?
- Ma u baahan tahay qof ku haga, si aad ugu sheegto shaqaalaha caafimaadka xaaladaada caafimaad, dhaqankaada ama xaaladahaada kale?

Waxaad caawinaad ka heli kartaa shaqaalaha taageerada dadka asalka kale leh, qof ku caawiya fahmayana dhaqankaada iyo luqadaada, waajibna ay ku tahay inuu sirta qariyo.



Kooxda  
taageerada asalka  
way ku hagayaan

# Muxuu qaban karaa qofka taageeraha ah?

Qofka taageeraha ah wuxuu kaa caawin karaa la xdhiidhka, marka aad u baahato inaad la xidhiidho qaybta caafimaadka kamuunka. Qofka taageeraha ah, wuxuu samaynayaa habka ugu fiican ee laguu caawin karo, haddii aad u baahan tahay talo bixin iyo in su'aalo aad qabto lagaa qanciyo. Qofka taageeraha ah waad la kulmi kartaa shakhsii ahaan ama waxaad kula hadli kartaa taleefan, haddaad u baahato talo bixin ama taageero kaleba. Waana mamnuuc in waxaad kuwada hadashaan loo gudbiyo dad kale.

Qof taageere ah  
ayaa ku caawinaya  
marka aad la  
xidhiidhayso  
kamuunka




# **Waa ayo qowmiyadaha taageerada dadka wax tarka lahi kale leh?**

Kooxda taageerada dadka asalka kale leh waa adeeg loogu tala galay, muwaadiniinta iyo qoysaskooda aan asal ahaan daanish ka soo jeedin. Kooxdan waxay ka hawlgashaa qaybta caafimaadka iyo daryeelka ee KBH Syd (Amager, Vesterbro, Kongens Enghave og Valby). Taageeryaasha ka mid noqonaya kooxdan waxaa lagu doortaa, iyadoo lagu qiimaynayo xirfadooda luqadeed iyo bini'aadamnimo.

# **Maxaa sameyn karta haddaad rabto inaad hesho kooxda qowmiyadaha wax tarka lahi?**

Haddaa doonayso inaad la hadasho qof taageera ah, waa inaad la soo xidhiidhaa xarunta xanaanada dadka waaweeyn, xarunta nashaadaadka, xarunta caafimaadka, ama meel walba oo aad kala xiriiri karta qaybta caafimaadka iyo daryeelka ee ee KBH Syd. Markaad la soo xidhiidho, iyaga ayaa kugu xidhaya isku-duwaha kooxda taageerayaasha dadka asalka kale leh.

Xusuuso inaad sheegto luqada aad ku hadasho iyo meesha aad asal ahaan ka soo jeedo, tani waxay noo fududaynaysaa inaan kuu helo qof taageera ah oo kugu haboon.



Waxaan kuu  
helaynaa qof  
taageere ah, oo  
kugu haboon



# Kala xiriir

Haddaad qabto wax su'aalo ah, waxaad kala xidhiidhi kartaa  
isku-duwaha Ayse Döner Toplu taleefankan  
23 81 74 25 ama e-mailkan Etniskressourceteam@kk.dk

Peder Lykke Centret  
Selvejende Institution  
Peder Lykkes Vej 63-65  
2300 København S

Telefon: +45 23 81 74 25  
Email: etniskressourceteam@kk.dk  
Web: www.pederlykkecentret.dk